

**DUGSIYADA DADWAYNAHA DENVER**  
**Qaybta Adeegyada Ardayda**  
**QAYBTA 504 EE XUQUQDA WAALIDKA/ARDAYGA EE AQOONSIGA, QIIMAYNTA IYO**  
**MEELAYNTA**

**Waxaad xaq u leedahay in:**

1. Dhallaankaagu kaqaybqaato, oo uu ka helo dheefo, barnaamijyada dadwaynaha iyada oon lagu takoorayn naafadiisa;
2. Degmo dugsiyeedku kaala taliso xuquuqdaada sida uu dhigayo sharciga dawladda dhexe;
3. Aad hesho ogaysiis la xidhiidh aqoonsiga, qiimanta, ama meelaynta ilmahaaga;
4. Ilmahaagu uu helo waxbarasho fiican oo dadwayne. Tan waxa kamid ah xaqa in wax loo baro ardayda aan naafa ahayn xadka ugu sarreeyaha ee habboon. Sidoo kale waxa kamid ah xaqa in degmo dugsiyeedku u samayso waafajino si ay ugu oggolaato ilmahaaga inuu fursad sinnaansho u helo kaqaybqaadashada hawlaha dugsiga iyo kuwa dugsiga la xidhiidh;
5. Ilmahaaga wax lagu baro xarumaha oo uu helo adeegyo la mid ah kuwa la siiyo ardayda aan naafada ahayn;
6. Aad ku hesho macluumaadka oo dhan luuqaddaada iyo/ama sida aad u xidhiidho;
7. Go'aamada qiimaynta, tacliineed, iyo meelayneed lagu saleeyo ilo macluumaad oo kala duwan, iyo qof yaqaan ardayga, xogta qiimaynta, iyo ikhtiyaarada meelaynta;
8. Ilmahaagu helo waafajino macquul ah haddii la ogaado inuu mutaystay sida uu dhigayo Qaybta 504 ee Xeerka Baxnaaninta;
9. Lagu siiyo gaadiidka tagista iyo ka imaanshaha xarun meelayneed oo kale iyada oo aan kharash dheeraad ah kugu kacayn marka loo eego kii aad gali lahayd haddii ardayga lagu meeleyo barnamij ay waddo degmadu;
10. Ilmahaaga la siiyo fursad loo siman yahay si uu uga qaybqaato hawlo aan tacliin ahayn iyo kuwa manhajka ka baxsan oo ay degmadu bixiso;
11. Baadho dhammaan diiwaanada la xidhiidha go'aamada la xidhiidha aqoonsiga, qiimanta, barnamijka tacliineed, iyo meelaynta ilmahaaga;
12. Aad ku hesho nuqulada diiwaanada tacliineed kharash macquul ah ilaa fiigu kuu diido inaad hesho diiwaanaa;
13. Aad uga hesho jawaab degmo dugsiyeedka codsiyada macquulka ah ee sharraxaadaha iyo tarjumaadaha diiwaanada ilmahaaga;
14. Codsado wax ka beddel diiwaanadaada tacliineed haddii ay jirto sabab macquul ah in la rumaysto in ay khalad yihiin, marin habaw keenayaan ama haddii kale ay jabinayaan xuquuqda asturnaanta ilmahaaga. Haddii degmo dugsiyeedkaagu diido codsigan wax ka beddelka ah, waxay kugu ogaysiin wakhti macquul ah, waxayna kugula talin xaqa aad leedahay dhagaysi;
15. Aad fayl garaysato ashkatada 504 haddii aad is khilaaftaan dugsiga;
16. Codsato dhexdhexaadin ama dhagaysi ama dacwadda nidaamka xuquuqda dhawrista oo dhexdhexaad ah oo la xidhiidha go'aanada ama tallaabooyinka la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta, barnamijka tacliineed ama meelaynta ilmahaaga. Adiga iyo ardayguba waad kaqaybqaadan kartaan dhagaysiga oo waxa idin matali kara qareen;
17. Cabasho ka fayl garayso Xafiiska Xuquuqda Rayidka, Region VIII, US Department of Education, Federal Building, Suite 310, 08-7010, 1244 Speer Boulevard, Denver, Colorado, 80204-3582. Taleefanka (303) 844-5695.

Qofka degmada ee ka masuulka ah xaqiijinta in ay raacday Qaybta 504 waa:

The person in the district who is responsible for assuring that the district complies with Section 504 is:  
Mr. John Liberatore, lambarka taleefanka 720-423-8900. Isu-duwaha Qaybta 504 ee Dugsiyada Dadwaynaha Denver waa: Mr. Paul Thomspen, lambarka taleefanka 720-423-8086.